

1. Waa maxay EBT ga Aafada (P-EBT) sideese ilmo ku jira SNAP kana yar 6 sano ugu qalmaan?

Sharciga federaalka ayaa u fasaxaaya Goballada inay dhaqangashaan barnaamij ku meel gaar ah oo loogu yeero Pandemic- Electronic Benefit Transfer (P-EBT), kaasoo siiya carruurta u qalma gunnooyinka Supplemental Nutrition Assistance Program (Barnaamijka Kaalmada Dhamaystirka Nafaqada ama (SNAP, oo horay loo oran jiray food stamps)). Ardayda fasalka barbaarinta (Pre-K) ilaa 12aad ee jooga dhismayaasha dugsiyada u qalma cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban ee lagu baxsho National School Lunch Program (NSLP, Barnaamijka Qaran ee Qadada Dugsiga) ama School Breakfast Program (SBP, Barnaamijka Quraacda Dugsiga) ayaa u qalmi kara gunnooyinka P-EBT. Carruurta ku jirta SNAP, kayar da'da 6 sano ee aan dhiganin dugsi, ayaa u qalma gunnooyinka P-EBT oo lagu saleeyay hoos u dhaca bil kasta ee cuntooyinka carruurta lagu siiyo xarumaha daryeelka ilmaha ee gobalka oo dhan muddo bil ah. P-EBT waa gunno gaar ah marka laga tago gunnada caadiyan qoysku helo bishii ee SNAP.

Barnaamijka waxa maamula Ohio Department of Job and Family Services (Waaxda Ohio ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska), waxayna Waaxdu wada shaqayn la leedahay Ohio Department of Education (ODE) (Waaxda Waxbarashada ee Ohio) si ay u xaqiijiyaan in carruurta mutaysatay ay helaan gunadan muhiimka ah.

2. Qaddar intee leeg ayuu heli doonaa ilmaha mutaystay?

Cunug kasta wuxuu heli doonaa **\$7.10** maalin kasta (Isku-darka lacagta caadiyan federaalku ku baxsho qiimaha quraacda, qadada, iyo cuntada fudud ee sanad dugsiyeedka 2021-2022) ee tirada maalmaha u qalma P-EBT ee bisha. Tirada maalmaha u qalma gunnada P-EBT ayaa lagu saleeyaa celceliska tirada maalmaha ee gobalka oo dhan ee muujinaaya hoos u dhaca cuntooyinka lagu baxsho xarumaha daryeelka. Tiradaan ayaa kala duwanaa karta bil kasta bisha Agoosto 2021 ilaa bisha Maajo 2022.

Bisha Agoosto 2021 cadadka ayaa ahaa \$28.40 (4 maalmood).

Bisha Sibteembar 2021 cadadka ayaa ahaa \$35.50 (5 maalmood)

Bishii Oktoobar ee sanadkii 2021 cadadka ayaa ahaa \$42.60 (6 maalmood).

Bishii Nufeembar 2021 cadadka ayaa ahaa \$28.40 (4 maalmood).

Bishii Diseembar 2021 cadadka ayaa ahaa \$35.50 (5 maalmood).

Bishii Janaayo 2022 cadadka ayaa ahaa \$49.70 (7 maalmood).

Bishii Febraayo 2022 cadadka ayaa ahaa \$35.50 (5 maalmood).

Cadadka bishii Maarso ilaa Maajo 2022 ayaan wali la go'aamin ayadoo lagu salaynaayo xogta la helay.

3. Sidee gunnooyinka P-EBT loo baxshaa?

Bil kasta oo ilmuhu u qalmo gunnada P-EBT, ODJFS (Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Ohio) ayaa ku shubi doonta gunnooyinka P-EBT koontada SNAP ee ilmuhu hadda ku helaayo gunnooyinka SNAP. Gunnooyinka waxaa loo isticmaalaa sida kuwa SNAP oo kale.

3. Immisa jeer ayaa gunnooyinka la bixiyaa?

Haddii ilmahaagu buuxiyey shuruudaha mutaysiga P-EBT ee bil, gunnooyinka waxa loo siin sida soo socota:

- Gunnooyinka Agoosto, Sibteembar, Oktoobar, Nufeembar, Diseembar, Janaayo iyo Febraayo ayaa la bixin doonaa dhammaadka Juun 2022.
- Gunnooyinka Maarso waxaa la bixin doonaa dhammaadka Luuliyo 2022.
- Gunnooyinka bisha Abriil ayaa la bixin doonaa dhammaadka Agoosto 2022.
- Gunnooyinka Maajo ayaa la bixin doonaa dhammaadka Sibteembar 2022.

4. *Miyey qoysasku dalban karaan gunnooyinka P-EBT?*

Maya. P-EBT ma lahan codsi.

5. *Muddo intee le'eg ayuu qoys uu heli karaa gunnooyinka P-EBT?*

Gunnooyinka P-EBT waxaa la heli doonaa 12 bilood. Haddii kadib 12 bilood gunnooyinka P-EBT aan la isticmaalin, waa laga saari doonaa (la ceshan doonaa) koontada. Dadka hadda qaata SNAP ayaa wali heli doona gunnooyinka u hray ee SNAP.

6. *Yay qoysku la xiriirayaan haddii ay su'aalo ka qabaan P-EBT?*

Su'aalaha barnaamijka ee guud, su'aalaha la xiriira gunnooyinka ilmahaaga, fadlan wac khadka adeegga macmiilka P-EBT 1-866-244-0071 dookha 1.